



# Dhaqista Dhismaha iyo Marinnada



Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

**!** Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

## Qorshayn

- Aqoonso in wasaqda khatarta dhalinaysa ay imaan doonto sabab la xariirta saliida ama olyada taala meesha, dhaqmada aasidka, jajabka riiniga ka samaysan maarta, iwm.
- Soo qaado dhammaan ruqsadaha iyo ogolaanshiyaasha muhiimka ah. Fasax ka qaado mulkiilaha dhismaha kahor intaadan bulaacada ku daadin meesha.

## Rakibida

- Raadi meel kamid ah goobta shaqada oo biyaha wasaqda ah si fudud loogu qaban karo oo aqoonso meesha aad biyaha wasaqda ah ku daadinayso. Qandaraasleyaal hoosaadku waa inay sidoo kale qabtaan ayna aruuriyaan biyaha dhaqista.
- Aqoonso meesha dhammaan daadku ku aruuro dusha iyo aagaga dhismaha.
- Si ku meel gaar ah u dabool marinka daadka roobka ee ku yaala gudaha ama aaga shaqadaada.
- Xaqiiji inaad haysato qalabka ku haboon si aad u hayso iyo/ama u aruuriso biyaha wasaqda ah ee goobtaada shaqada sida gidaarada, aagaga xakameynta bulaacada ee la qaadi karo, daboollada biyaha daadka, taangiyada biyaha qabta, tuubooyinka waraabka ama bamamka haawinta.
- Adeegso farsamooyinka kale ee aan sunta lahayn iyo saabuunta khatarta yar, wasaq fujiyaasha, iyo agabka kale ee nadiifinta.

waan
**difaaci karnaa**
**marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.

*tilmaamo dheeraad ah >>>*

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***

JANAAYO 2022







## Dhaqmada

- Xaaqida, aruurinta, iyo fogaynta dhammaan qashinka yaala dhulka kahor intaadan meesha dhaqin.
- Adeegso agabka dheecaanka dhuuqa sida cuntada biisada si aad u nadiifiso meelaha saliida leh; qashinka ugu dar dareere kasta si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka degsan.
- Aruuri oo qabo dhammaan biyaha kasoo daata dhaqmada si loo daaweeyo, dib loogu isticmaalo, ama si sax ah qashinka loogu daadiyo si waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka quseeya.

### XAALADAHA GAARKA AH

*Bulaacada ka timaada meelaha lagu dhaqaayo matoorada, tababarada gaari wadista, diyaaradaha, taayirada diyaada, tareennada, xarumaha gaaska, ama nooc kasta oo aasidka lagu dhaqo* ***waa in markasta*** *lagu shubaa meelaha wasaqda khatarta badan.*

*Haddii aad wax ku dhaqayso meel riinjiga la marshay kahor 1978, riinjiga waxaa ku jiri kara maar. Waa masuuliyad ku saaran inaad go'aamiso in riinjigu uu yahay mid maar ka samaysan kahor intaadan fujin. Haddii riinji ka samaysan maar uu soo dhaco inta nadiifinta la wado, bulaacada ayaa lahaan doonta shuruudaha qashin ku darista oo qaas ah. La xariir Ismaamulka San Diego ood ka wacayso (858) 694-2888, kadibna la hadal Nadiifiyaha wasaqda warshadaha, si aad u waydiiso bixinta riinjiga ku salaysan maarta iyo qashin ku daristiisa.*

*Bulaacada aysan ku jirin sunta kor lagu sheegay wax kamid ah ayaa lagu shubi karaa bulaacad qaadaha qashinka oo leh ogolaanshaha hore ee wakaalada bulaacada, si uu u geeyo goob la oggol yahay (wasaq, taag leh) taasoo awooda inay biyaha liqdo, ama aruuriso ayna hayso biyaha si loogu sifeeyo ama loogu daadsho meel kale.*

**Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Difaaca harka biyaha ee Ismaamulka (WPO).** ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.***

**waad ku mahadsan tahay**
**inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.**

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***

JANAAYO 2022